

Qaybta daryeelka dhallaanka cusub

Ku soo dhawoow qaybta daryeelka dhallaanka cusub

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta

Ku soo dhawoow daryeelka dhallaanka cusub

Tani malaha ma aha meeshaad rajaynaysay inaad la joogto ilmahaaga cusub. Waxaan halkan u joognaa inaan kaa caawino. Waxaan ku siin doonaa adiga iyo ilmahaaga daryeelka ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah.

Daryeelka Qoyska ee Wadajirka ah

Adigu waxaad ka mid tahay qaybta ugu muhiimsan ee daryeelka ilmahaaga. Waxaan rabnaa inaan xaqiijino inaad ogaato waxa dhacaya iyo waxa aad u qaban karto ilmahaaga.

Waa lagugu soo dhawaynayaa inaad la joogto ilmahaaga waqti kasta maalintii ama habeenkii. Waad waydiin kartaa waxa dhacaya, ama sida ilmahaagu yahay, wakhti kasta oo aad rabto. Waxaan rabnaa inaad ka qayb qaadata daryeelka ilmahaaga intii ugu badan ee suurtoogalka ah.

Isgaarsiinta

Haddii Ingiriisigu uusan ahayn luqadda koowaad, waxaan isku dayi doonaa inaan isticmaalno luqadda aad fahanto oo ku hadasho. Waxaan qabanqaabin doonaa turjubaan kaa caawinaya arrintan.

Booqashooyinka qaybta bukaanka iyo Wada-shaqaynta

Waxaan jeclaan lahayn inaad ka qayb qaadata wada-hadallada ku saabsan ilmahaaga.

Subax kasta waxaa jira booqasho qaybta bukaanka ah oo ay kooxda booqato ilma kasta oo qaybta ku jira, kadibna ka wada hadlaan qorshayaasha ilmahaas. Tani waxay dhacdaa inta u dhaxaysa 9:30 subaxnimo iyo 11:30 subaxnimo. Waa lagugu soo dhawaynayaa inaad la joogto ilmahaaga waqtigan. Waxaan jeclaan lahayn inaad noo sheegto sida adiga iyo ilmahaagu tihin.

Nambarrada xiriirka ee muhiimka ah

Haddii aadan imaan karin isbitaalka, waad nasoo wici kartaa si aad u ogaato sida ilmahaagu yahay iyo waxa dhacaya. Si loo ilaaliyo asturnaantaada, waxaan kaliya kaala hadli karnaa waxa ku saabsan ilmahaaga, ma aha saaxiibada ama xubnaha kale ee qoyska.

Lambarrada telefoonka ee muhiimka ah waxay ku jiraan dhinaca kale ee bogga.

Qaybta Daryeelka Ilmaha ee Winnicott (St Mary's)

Qaabilaadda 020 3312 1103
Daryeelka degdegga ah 020 3312 6294
Daryeel gaar ah 1 020 3312 5059
Daryeel gaar ah 2 020 3312 5776

Qaybta Daryeelka Dhallaanka Cusub ee Queen Charlotte

Qaabilaadda 020 3313 5158
Daryeelka degdegga ah 020 3313 3174
Daryeel gaar ah 1 020 3313 3908
Kalkaalisada Taageerta Qoyska 07810 557818

Macluumaad dheeri ah

Waxaan ku dadaali doonnaa intii karaankeenna ah adiga iyo ilmahaaga.

Haddii aad ka walwasho ama aanad ku faraxsanayn wax kasta, la hadal xubin ka tirsan shaqaalaha. Waxaan rabnaa inaan wada shaqeyno si aan u bixino daryeelka ugu wanaagsan adiga iyo ilmahaaga.

Qaabab kala duwan

Waxaad weydiin kartaa shaqaale haddii aad u baahan tahay buug-yarahan sida:

- Akhriska fudud
- Daabacaada weyn, habka qoraalka taabashada ee dadka indhaha la' ama duubis cod ah

Qaybta daryeelka dhallaanka cusub
La daabacay: Abriil 2025
Taariikhda dib-u-eegista: Abriil 2028
Lambarka tixraaca:
© Imperial College Healthcare NHS Trust